Waxaa laga soo turjumay af-Iswiidhish

Macluumaad kugu socda adigaaga waalidka ah ee leh canug dhigta dugsi hoose-dhexe

2021-01-11

Ku soo dhawaw xilli dugsiyeedka guga ee 2021

Si diirran ugu soo dhawaw xilli dugsiyeedka cusub ee dugsiga hoose-dhexe. Macluumaadkan wuxuu ku saabsanyahay ruutiinka dugsiga hoose-dhexe ee xagga aafada corona iyo cudurka covid-19. Macluumaadku wuxuu kugu socdaa adigaaga leh carruur iskool dhigata.
Halka aan ka duuleyno waa in dugsiyada hoose-dhexe, dugsiyada hoose-dhexe ee carruurta xagga caqliga naafada ka ah iyo guryaha xilliga firaaqada ee Norrköping ay furnaan doonaan iyadoo ay hawlaha caadiga ah iskoolka ka dhex socon doonaan. Waxa ugu muhiimsan ee aan diiradda saareyno waa in arday walba uu gaaryo hadafyadiisa, waxaanna ka shaqeyneynaa in aan duruufaha ugu fiican u abuurno in arday walba uu horuumarka ka gaaryo meesha ugu dheer ee suurta gal ah.
Waxaan raaceynaa talooyinka xukuumadda, Hey'adda caafimaadka bulshada iyo Gobalka Östergötland. Dhammaan meelaha ay hawluhu ka socdaan ee degmadu waa ay la socdaan hadba meesha ay xaaladdu mareyso.

Isbeddello ay aafadu ugu wacantahay

Inti deyrta lagu jiro waxaa la sameeyay isbeddello fara badan oo xagga hawlaha iskoolka ah, gugana sidaas ayey wax sii ahaanayaan. Waxay arrintu tusaale ahaan ku saabsanaan kartaa in aan la oggoleyn in dad badan uu meel isugu yimaado halkaas oo fasallada la meel isugu keenayo, in kulanka waaliddiinta iyo wadahadalka horuumarka ardaydu ay u dhacyaan si digital ah, in si dheeri ah nadaafadda loogu dadaalo iyo in keenidda iyo wadidda ardaydu ay dibadda ka dhacdo. Bogga degmada ee intarneetka ayaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku saabsan xaalad waafajinnada laga dhex sameynayo hawlaha iskoolka.

Distans wax ku dhigid

Haddii covid-19 awgiis ay cudur ku maqnaashadu badato oo laga yaabee ay taas ka dhalato in ay arrintu adkaato waxaa dhici karta in iskoolka loo beddelo in distans wax lagu dhigo. Haddii ay xaalad noocaas ah ay timaado iskoolka ayaad warbixin ka heli doontaa. Haddii la xirayo guriga xilliga firaaqada waxaad adigaaga ka shaqeeya hawlo bulshada muhiim u ahi xaq u leedahay in meel kale laguugu xannaaneeyo canuurta haddii labada waalid ay ka shaqeeyaan hawlo

bulshada muhiim u ah. Warbixin dheeraad ah oo taas ku aaddan waxaad ka heleysaa bogga intarneetka ee degmada, www.norrkoping.se

Carruurta guriga ku hayso haddii ay jirranyihiin

Waa muhiim in ay carruurtu iskoolka ka joogaan haddii ay xanuunsanyihiin. Waa sidaas arrintu iyadoo aan taas loo egeyn cudurka haya nooca uu yahay. Infekshinnadu waxay noqon karaan kuwo waqti gaaban canugga haya ama kuwo waqti dheer canugga haya, inta uu canuggu guriga joogayana waxay ku xirantahay in infekshinku uu yahay mid waqti gaaban ama in uu yahay mid waqti dheer qofka haynaya. Bogga 1177.se waxaa ku jira macluumaad ku aaddan waxyaabaha khuseeya Gobalka Östergötland marka laga hadlayo karantiilka, inta uu qofku guriga joogayo marki lagu arko covid-19 ama calaamadaha cudurka covid-19.

1177.se – Ilaa intee ayaan guriga joogayaa?

Haddii cid qoyska ka mid ah ay qabto covid-19

Carruurta iyo ardaydu waa in ay ka joogaan iskoolka haddii cid qoyskooda ka mid ahi ay qabto covid-19. Waxay taasi ka dhigantahay in marka ay xigtadoodu qabto covid-19 ay carruurta iyo ardaydu guriga joogayaan xitaa haddii ay caafimaad qabaan oo aysan lahayn calaamado cudur.

Iskool joogid

Carruurta iyo ardaydu waa in ay iskoolka joogaan haddii ay caafimaad qabaan, gurigoodana aan laga qabin covid-19. Halka laga duulayo waa in waxbarashadu ay iskoolka ka dhaceyso.

Waxbaad caawin kartaa adigoo iskoolka iyo shaqada ku aadaya si kale oo aan ahayn in aad raacdid bas ama tareenka magaalada dhex mara

Arday badan waxay maanta iskoolka u raacaan gaadiid dadweyne. Laakiinse waxaan rabnaa in aan ku boorrinno kuwa awoodo in ay iskoolka si kale ku yimaadan in ay saas sameeyaan – lugey, baaskiil qaado ama si kale dooro haddii ay suurta gal tahay.

Haddii ay khasab tahay in aad raacdid gaadiid dadweyne waxaa aad iyo aad u sii muhiimsan in aad masaafo u jirsatid musaafiriinta kale. Waxay taasi khuseysaa marka gaadiidka la saaranyahay iyo marka maxaddada la joogo intaba, laakin sidoo kale marka aad raaceysid iyo marka aad ka degeysid gaadiidka. U daa kuwa soo degaya in ay soo degaan inta aadan adigu gaadiidka raacin. Haddii aad haba yaraatee dareemeysid calaamado hargab waa in aad guriga joogtaa oo aadan raacin gaadiidka dadweynaha si loo yareeyo faafitaanka cudurka.

Sii wad raacitaanka talooyinka iyo tusmooyinka guud

Waxaan rabnaa in iskoolladeennu ay furnaadaan iyo in ardaydenno ay iskoolka wax ku dhigtaan. Si taasi ay u suurta gasho waxaan u baahannahay in dhammaan

la is kaashado oo ay cid walba xil isi saarto. Sii wad raacitaanka talooyinka iyo tusmooyinka guud. Wada jir ayaannu ku joojin karnaa faafitaanka cudur.

Bogga norrkoping.se waxaa ku jira macluumaad ku aaddan feyruska corona, su'aalo iyo jawaabo iyo isku xirayaal kuu gudbinaya hey'ado kale oo dowladeed. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusbooneysiiyaa:
https://www.norrkoping.se/information-om-coronaviruset

Waxaa sidoo kale halkan ku jira boggag gaar ah oo intarneet ah, oo loogu tala galay carruurta iyo dhallinyarada, oo ku jira bogga norrkoping.se. Halkaas waxaan hal meel isugu ururinnay macluumaadka la xiriira feyruska, si ay u fududaato in si fudud loo helo. Waxaa halkaas ku jira macluumaad rasmi ah oo feyruska ku saabsan oo si fudud loo akhrisan karo iyo talooyin ku aaddan sida uu qofku isu daryeeli karyo haddii uu guriga joogyo oo uu leeyahay calaamado cudur oo khafiif ah, laakin sidaas oo ay tahay uu isku dayayo in uu waxbarashada la socdo. Fadlan canuggaaga uga sheekey boggan, ama si wada jir ah isula booqda:
norrkoping.se/corona-information-till-unga

Haddii aad su'aalo qabtid ama aad jiraan waxyaabo aad isweydiineysid ku soo dhawaw in aad la xiriirtid maamulaha canuggaaga.
Salaan saaxibtinimo

Jenny Östlund, madaxa hawlaha dugsiga hoose-dhexe F-6 iyo dugsiga hoose-dhexe ee carruurta xagga garaad naafada ka ah
Mikael Hultberg, madaxa hawlaha dugsiga hoose-dhexe F-6 iyo dugsiga hoose-dhexe ee carruurta xagga garaad naafada ka ah
Hans Grimsell, madaxa hawlaha dugsiga hoose-dhexe 7-9 iyo jardiinooyinka xilliga firaaqada